# Hagaha Kaqaybqaataha

## Yaraynta Khatarta Waxyeellada ka Dhalata Jugta Madaxa loo Geysto

Qoraalkaanu wuxuu qayb ka yahay shuruudaha tababarka Sharciga 2/Sharciga 3 ee loogu talagalay bixiyeyaasha Daryeelka Caruurta
2024

**1 saac**

**Qaybta Nuxurka Hanaanka Aqoonta iyo Howlkarnimada (KCF, Knowledge and Competency Framework) Iyo Qaybaha Nuxurka CDA**

Qaybaha Koowaad ee Nuxurka Hanaanka Aqoonta iyo Howlkarnimada Iyo Qaybaha Nuxurka CDA:

Qaybta Nuxurka KCF: VII. Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqada

Qaybta Nuxurka CDA: Deegaan Waxbarasho oo Ammaan iyo Caafimaad Qaba

**Ujeedooyinka Waxbarashada:**

Ayada oo tababarka kaliya uusan xaqiijinayn ujeedooyinka waxbarashada, haddana waxaa loo qaabayn karaa in lagu gaaro yoolal gaar ah oo loogu tala galay arday walba. Haddii ardaydu noqdaaan kuwo wadashaqayn iyo ka qaybqaadasho leh waxay baran doonaan sida:


- Loo qeexo Waxyeellada ka Dhalata Jugta Madaxa loo Geysto.
- Ka niqaashi karaan astaamaha iyo cawaaqibka ka dhasha waxyeellada ka dhalata jugta madaxa loo geysto.
- Baran karaan waxyaabaha keenaya khatarta waxyeellada ka dhalata jugta madaxa loo geysto.
- Baran karaan istiraatiijiyadaha la adeegsado marka qofku welwelsanyahay, xanaaqsanyahay ama niyadjabsanyahay.

**Hanaanka Kulanka**


| Qaybta | Guudmar |
|---|---|
| 1. Soodhaweyn iyo Horudhac | • Niqaashka kooxda balaaran |
| 2. Caafimaadka Waxyeellada ka Dhalata Jugta Madaxa loo Geysto. (AHT) | • Howl koox yar<br>• Bandhigga kooxda balaaran |
| 3. AHT: Astaamaha iyo Cawaaqibta | • Bandhigga kooxda balaaran |
| 4. Qodobada khatarta keenaya iyo daryeelka bixiyaha doorka bixiyaha | • Bandhigga kooxda balaaran |
| Muujinta Soo koobista | • Niqaashka Kooxda Balaaran<br>• Falanqayn Shakhsi ah<br>• Qiimaynta |



Dhalaanka ayaa si gaar ah loo aaminsanyahay inay ugu nugulyihiin waxyeellada ka dhalata jugta madaxa loo geysto sabab la xiriirta madaxooda oo balaaran sidoo kalena culus, kaasoo u dhigma 25% guud ahaanba culayska jirkooda. Murqahooda surku waa kuwo aad u jilicsan oo aan hayn karin madaxa sidaa u weyn (NCSBS).
Dhalaanku waxay sidoo kale leeyihiin lafta madaxa oo ah mid khafiif ah, oo jilicsan.




- Awoodo waaweyn oo marmar kala baxaya ayaa samaysma kuwaas oo maskaxda ka dhigaya inay ku wareegto lafta madaxa dhexdeeda.
- Marka ruxmashadu dhacdo, xididada dhiigga siiya maskaxda ayaa dilaaci kara, taasoo keenaysa in dhiig bax ka dhaco maskaxda hareeraheeda.
- Dhiiggu wuxuu fariisnaayaa madaxa, mararka qaarkood wuxuu cadaadis dheeraad ah saarayaa madaxa waxaana suuragal ah inuu keeno waxyeelo maskaxda soo gaarta.




Dhiigbax ku yimaada indhaha (qaybta danbe ee isha) ayaa aad u badan

**Astaamaha AHT waxaa kamid noqon kara walow aysan ku ekayn:** (NCSBS nd, Chiesa & Duhaime, 2009; NIH, 2009)

## Astaamaha Degdega ah:

**Astaamaha waxaa kamid noqon kara walow aysan ku ekayn:** (**NCSBS (2024)** nd, Chiesa & Duhaime, 2009; NIH, 2009)

Astaamaha Degdega ah:

- **Neefta oo dhibta**
- Maqaarka oo madoobaada ama buluug noqda
- **Dabeecad xumo xad-dhaaf ah,** ama isbadalo kale oo ku yimaada habdhaqanka, khaasatan habdhaqan madax adayg, iyo degenaansho la'aan ah, walow ay jiraan iskudayada qancinta iyo koolkoolintu.
- **Qalal**
- **Shaqada murqaha oo yaraata**
- **Adkaanta ama qaabka jirka**
- **Awood la'aanta kor u qaadista madaxa**
- **Heerka dhiifoonaanta oo yaraada**, digtoonaanta, **tamar la'aan**, hurdaysan
- Jawaab celinta oo yaraata
- **Matag; cunto xumo**
- **Nuugidda ama wax laqista oo xumaata**
- **Qosol iyo hadal la'aan**
- Wadnaha ayaa istaagi kara
- **Nabaro nooca xagashada ah oo kasoo baxa gacmaha ama xabadka**
- **Madaxa ama wajiga oo u muuqda mid ka weyn sida caadiga ah**
- **Baro jilicsan oo ku yaala madaxa kuwaas oo u muuqda inay soo baxayaan**
- Indhabeel
- **Awood la'aanta in indhuhu diiradda saaraan lana socdaan dhaqdhaqaaqyada**
- **Ubucda indhaha oo aan is le'egkayn**
- **Dhimasho**

## Cawaaqibta Muddada Dheer ah:

- Naafanimo dhanka waxbarashada ah
- Naafanimo dhanka jirka ah
- Naafanimo indhaha ah ama indhabeelis
- Naafanimo maqalka ah
- Naafanimo hadalka ah
- Naafanimada Dhaqdhaqaaqa Jirka
- Qalal
- Xanuuno dhanka habdhaqanka ah
- Naafanimo garaadka ah

## Waxa ay tahay inaad ka eegto:

***Waa muhiim in si dhakhso ah daryeel caafimaad loogu raadiyo haddii ilmaha ama canuggu wjaahayo mid kamid ah astaamaha soo socda:***

- Isbadal weyn uu ku yimaada qaabka hurdada ama awood la'aanta inuu hurdada ka tooso
- Matag (inta caadiga ah ka badan)
- Suuxdin ama qalal

- Dabeecad xumo sii kordhaysa
- Aan la koolkoolin karin, iyo
- Aan la awoodin in la nuujiyo, ama dhalada caanaha la siiyo.

**<u>Xaaladaha aadka u daran, caruurtu waxay noqon karaan kuwo:</u>**

- Aan felcelin lahayn ama
- Aan miyir lahayn

**Ama waxaa dhici karta inaysan jirin astaan jireed oo muujinaysa AHT gabi ahaanba ayada oo haddana canuggu qabo dhaawac weyn.**

- Caruurta qabta AHT waxay u muuqan karaan uwo gabi ahaanba caadi ah ama aan dhaawac qabin marka kor laga arko
- Astaamaha iyo calaamaduhu waxay noqon karaan kuwo qarsoon oo si fudud loogu khaldi karo walaacyada kale ee caafimaadka

**Adeegyada Degdega ah ee Caafimaadka (911)** waa in la wacaa waana in canugga la geeyaa waaxda xaaladaha degdega ah si dhakhso ah haddii uu wajahayo wax kamid ah *astaamahaan* iyo calaamadahaan AHT ee kor ku qoran

---

# <u>Waxbarashada Waalidka</u>

- U xaqiijinta waalidka in ay caadi tahay in caruurtu ay ooyaan:
  a) oohintu waa qaab caruurtu ku wadahadlaan.
  b) oohinta xad-dhaafka ah waa qaybta caadiga ah ee koritaanka ilmaha.
  c) caruurtu waxay inta badan ooyaan inta u dhexaysa 2 ilaa 4 bilood.
  d) Oohinta muddada dheer, aan la qancin karin waxay si guud usoo yaraataa marka ilmuhu gaaraan qiyaastii 5 bilood.
  e) Caruurta oohinta badan waa kuwo caafimaad qaba waxayna oohinta u joojiyaan si kedis ah.

- Bar waalidiinta caruurta khataraha ruxruxidda canugga iyo waxa ay samaynayaan haddii ay ku xanaaqaan, caroodaan, ama ka niyadjabaan marka ilmahoodu uu leeyahay wakhtiyo oohin ah oo aan la qancin karin ama uu smaeeyo waxyaabo kale oo ka xanaajin kara, sida fad-qalalaynta daawashada telefishinka, cayaaraha, xiliyada hurdada, iwm.

- U sheeg waalidiinta in oohintu noqon karto mid keenaysa caro, khaasatan marka qofku daalan yahay uuna welwelsanyahay. Xooji in oohintaasu tahay mid caadi ah iyo in ay kasoo rayn doonto.

- U sheeg waalidka sida looga tago ilmihiisa ama ilmaheeda goob ammaan ah marka uu ama ay nasanayso.

- Noqo mid dareen leh oo wax taageera marka waalidiintu iskudayayaan inay dajiyaan ilmahooda ooyaya.

## Cabirka/Muujinta Waxbarashada: 3-2-1 Qorshe Howleed

Dhowr daqiiqo ku bixi inaad ku muujiso waxa aad kusoo baratay kulamadaan. Isticmaal meelaha banaan hoose ee anaan si ada u muujiso aragtidaada iyo qorshe howleedkaaga.

**3 Shay oo Muhiim ah** oo aan ka bartay waa…

**2 shay oo Aan Ku meelmarin Doono** Barnaamijkayga waa...

**1 Talaabo** oo Aan Si Degdeg ah u Qaadi Doono waa...

## Ilaha

**American Academy of Pediatrics (Machadka Dhallaanka ee Maraykanka)** American Academy of Pediatrics (AAP) iyo dhakhaatiirta dhallaanka ee xubinta ka ah waxay dadaalkooda iyo khayraadkooda u hurayaan caafimaadka, badqabka, iyo ammaanka dhalaanka, caruurta, iyo da'yarta qaangaarka ah, iyo dhalinyarada yaryar. AAP wuxuu leeyahay qiyaastii 60,000 oo xubnood oo kala jooga Maraykanka, Canada, iyo Koonfurta Ameerika. AAP wuxuu soo saaraa habraacyo ku saabsan arrimaha caafimaadka dhalaanka ee kala duwan wuxuuna ka qaybqaataa qaybinta agabka waxbarashada bukaanka ee faraha badan. ***www.aap.org***

**National Children's Advocacy Center Child Abuse Library Online** Maktabadda Onleenka ah ee Xdagudubka Caruurta ee Xarunta U qareemidda Caruurta ee Qaranka waa mid kamid ah nuqulada xirfadeed ee ugu balaaran ee aqoonta laga qoray, agabka waxbarashada, iyo ilaha la xiriira xadgudbyada caruurta loo gaysto ee gudaha Maraykanka. Waxay siisaa tababar, adeegyo onleen ah, iyo jaantusyo naqshadaysan ururada iyo shakhsiyaadka, waxayna siisaa khayraad xirmooyin ah dadka go'aanka gaara iyo cilmibaareyaasha. ***www.nationalcac.org***

**National Alliance of Children's Trust iyo Prevention Funds(Isbahaysiga Qaran ee Wakaaladda Caruurta iyo Sanduuqa Kahortagga)** Isbahaysiga Qaran ee Wakaaladda Caruurta iyo Sanduuqa Kahortaggu waa urur xubin ah oo bixiya tababar, caawimaad farsamo, iyo furasadaha talo-bixinta dadka dhexdiisa ah ee la siinayo Wakaaladad caruurta gobolka iyo sanduuqyada Kahortagga si loo xoojiyo dadaalada loogana hrtago xadgudubka caruurta loo gaysto. ***www.msu.edu/user/nactpf/*****National**

**National Center on Shaken Baby Syndrome (Xarunta Qaran ee Xanuunada Ruxista Caruurta)** Xarunta Qaran ee Xanuunada Caruurta Gariirka Qabta waxay leedahay yool ay wax ku barayso kuna tababarayso waalidiinta iyo xirfadleyaasha kuna samaynayso cilmibaaris kahortagaysa gariirka iyo xadgudubka dhalaanka ku sugan Maraykanka. Waxay caawimaad siisaa xirfadleyaasha iyo waalidiinta raadinaya macluumaadka, aragtiyada, iyo jawaabaha su'aalaha ku saabsan SBS. ***www.dontshake.org***

**National Indian Child Welfare Association (Ururka Qaran ee Daryeelka Caruurta Hindida ah)** Ururka Qaran ee Daryeelka Caruurta Hindida ah (NICWA) wuxuu wax ka qabtaa arrimaha ku xadgudubka caruurta iyo dayacaadda asaga oo adeegsanaya tababar, cilmibaaris, siyaasad bulsho, iyo horumar bulshadu sal u tahay. NICWA waxay sare u qaaddaa nolosha caruurta Hindida ah ee Maraykanka iyo qoysaska ayada oo ka caawinaysa qabaa'ilka iyo adeegbixiyeyaasha kale meelmarinta howlaha dhaqan ahaan ku haboon, bulshadu leedahay, diiraddana lagu saarayo awoodda iyo hantida qoysaska. ***www.nicwa.org***

**National Scientific Council on the Developing Child (Golaha Qaran ee Cilmiga Koritaanka Canugga)** Golaha Qaran ee Cilmiga Koritaanka Canuggu waa iskaashato qaybo kala duwan leh oo isugu jirta aqoonyahanada caaradka u ah cilmiga neerfaha, koritaanka caruurta ee xiliga hore, dhakhaatiirta caruurta, iyo dhaqaalaha**.** *www.developingchild.ne**t***

**Prevent Child Abuse America (Kahortagga Ku xadgudubka Caruurta ee Maraykanka)** Kahortagga Ku xadgudubka Crauurta ee maraykanku waxay ka shaqaysaa kahortagga ku xadgudubka iyo dayacaadda caruurta qarankeenna. *Ayada oo adeegsanaysa xarumaheeda ay ku leedahay 43 gobol iyo adeegyadeeda booqashooyinka guryaha ee mutadawacnimada ah ee ay* Healthy Families America® ka *bixiso in ka badan 400 oo xaafadood oo waddanka oo dhan ah, Kahortagga Ku xadgudubka Caruurta ee Maraykanku waxay gacan ka gaysataa bixinta waaya-aragnimo caafimaad leh, ammaan ah, oo barbaarin leh taasoo la siinayo in ka badan 100,000 oo qoys sannad walba*. ***www.preventchildabuse.org/index.shtml***

**Shaken Baby Alliance (Isbahaysiga Ruxruxista Ilmaha)** Isbahaysiga Ruxruxista Ilmaha waxay hay'adaha bulshada iyo xirfadleyaasha kala shaqaysaa sidii ay u bixin lahaayeen taageerada qoysaska dhibaneyaasha (ay kamid yihiin waalidiinta caruurta korsada iyo kuwa soo qaata) ee SBS si loogu qareemo cadaalad helista dhibaneyaasha SBS, iyo si loo kordhiyo wacyiga dhibaatada. ***www.shakenbaby.com*** **Zero to Three (Eber ilaa Saddex)** Yoolka Eber ilaa Saddex waxaa loogu talagalay in lagu taageero koritaanka caafimaadka qaba iyo badqabka dhalaanka, ilmaha socod-baradka ah, iyo qoysaskooda. Ururku wuxuu arintaan ku ggaarayaa asaga oo wacyigalinaya, waxbaraaya, sidoo kalena taageeraya dadka waaweyn ee saamaynta ku leh nolosha dhalaanka iyo ilmaha socod-baradka ah. ***www.zerotothree.org***

**Hagaha Tixraaca ee Loogu Talagalay Dadka ay Waajibka ku tahay inay soo sheegaan Walaacyada Xadgudubka Carruurta** ee uu Qof walba si iskiis ah usoo sheegi kara ku xadgudubka caruurta ama dayacaadda ee uu ka shakiyo asaga oo usoo gudbinaya hay'adda difaaca caruurta ee maxaliga ah ama hay'adaha sharciga. Haghaanu wuxuu gacan ka gaysanayaa in si fiican loo fahmo xeerka soo sheegista waajibinaya, kaasoo qeexaya talaabooyinka ku haboon iyo qaababka ugu wanaagsan, haddii la ogaado ama laga shakiyo in caruurta lagu xadgudbay ama la dayacay. ***Hagaha Ilaha Soo gudbinta Waajibka ah (state.mn.us)*** ***Janaayo 2023***